S-4: Nidaamyada Maamulka Xaadirista Ardayda iyo ka Reebida Dugsiga

TIXRAACYO

Xeerka Gudiga S-4

QEEXITAANNADA

Maqnaanshaha: Ku fashilmida in ilmaha da'da dugsiga ku jira ee loo dhiibay casharka ama xiisada casharka inuu xaadiro casharka ama xiisada casharka. "Maqnaanshaha" ama "maqan" kama dhigna soo daahida marar badan oo loo adeegsado xisaabinta maqnaansho sabab la xiriirta googoysnimo.

Maqnaanshaha Cudurdaarka leh: Ka maqnaanshaha dugsiga kaasoo leh sabab sax ah taasoo ay ku jiraan xanuun jireed ama mid dhimirka ah, geerida qof ehel ah, munaasabada qoyska, xuska ciid diimeed, shaqada dugsiga oo la ogolaaday, ama fasax waafaqsan IEP da ama qorshaha caawimaada Qaybta 504 ee ardayga.

Goo-goys: Waa xaalad uu ilmaha gaaray da'da dugsiga, bilaa sabab sax ah, ka maqan yahay dugsiga ugu yaraan nus kamid ah maalinta. Ilmo gaaray da'da dugsiga ayaan loo arkayn mid goo-goys badan wax ka badan halmar inta lagu jiro maalinta.

Dugsiga Guriga: Waa nidaam badel u ah waxbarashada dugsiga dadwaynaha kaasoo ilmaha jira da'aha u dhexeeya lix iyo 18 sano wax lagu baro guriga si rasmi ahna looga reebo xaadirista dugsiga dadwaynaha ee qasabka ah.

Waalidka: Marka loo eego habraacyadaan maamulka iyo xeerka gudiga ee qusaysa, "Waalidka" waxaa laga wadaa:

A. waalidka ilmaha dhalay ama korsaday;
B. waalidka sharciga ah ama qof kale oo sharciyan awood u leh inuu go'aannada waxbarashada u gaaro ilmaha;
C. shaqsi, kaasoo ilmuhu la nool yahay, kaasoo noqonaaya waalidka marka uu maqan yahay waalidka rasmiga ah ama masuulka rasmiga ah;
D. waalidka ilmaha korsaday haddii awooda waalidka ilmaha dhalay ama waalidiinta korsaday ee gaarista go'aano waxbarasho ayagoo wakiil ka ah ilmaha la joojio ama si gaar ah loogu xadido amar maxkamadeed;
E. marka uusan joogin shaqsi u qalma qaybaha lagu qeexay A-D, waalid wakiil ah oo la magacaabay kaasoo waafaqsan Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah; iyo/ama
F. xaaska waalidka ilmaha haddii xaaska waalidka ilmuhu uu si maalinle ah ula nool yahay waalidka ilmaha dhalay iyo ilmaha, waalidka kalena uu guriga ka maqan yahay. Xaaska waalidka ilmaha oo aan maalin kasta joogin guriga ilmaha ayaan wax xuquuq ah ku lahayn ilmaha sida ku cad Sharciga Xuquuqaha iyo Sirta Waxbarashada Qoyska (FERPA) kaasoo quseeya diiwaannada waxbarashada ilmaha. Xaaska waalidka ilmaha oo aan lahayn masuuliyada ilmaha awood uma lahan inuu geeyo ama ka diiwaan gasho ilmaha dugsi.

"Waalidka" kuma jiro gobalka ama wakaalad kale oo siyaasadeed oo dawlada kamid ah.

Maalinta dugsiga: Qayb kamid ah maalin dugsiga la dhiganaaya taasoo ilmaha gaaray da'da dugsiga laga doonaayo inuu dugsiga joogo si uu u qaato casharada.

Ilmaha gaaray da'da dugsiga: Ilmo yar oo jira ugu yaraan lix sano laakiin ka yar 18 sano jir; aana ka madax banaanayn waalidkiis.

Ogeysiinta Goo-goysnimada: Ogeysiis lasoo saaro si waafaqsan sharciga gobalka loona diro arday iyo waalidkiis si loogu wargeliyo jebinta sharciyada goo-goysnimada.

Maqnaansho aan Loo cudur daarin: Maqnaansho kasta oo aan lahayn sabab ama cudur daar sharci ah.

HABRAACYADA DHAQAN GELINTA

I. Qorshaha Xaadirista ee Dugsiga oo Dhan

A. Marka la diiwaan gasho, dugsiga ama degmadu waa inay waalidiinta iyo ardayda siisaa nuqulka Siyaasada Gudiga S-4: Xaadirista Ardayda iyo ka Reebida Dugsiga iyo habraacyadaan maamulka.
B. Dugsi kasta waa inuu si guud u daabacaa ogeysiiska waxbarashada qasabka ah uguna daabaco warlalistada dugsiga, daabacaadaha kale ee loo diro bulshada iyo macaamiisha, iyo webseedyada dugsiga/degmada.
C. Dugsi kasta waa inuu lahaado qorshe uu kula socdo uuna ku xaqiijiyo xaadirista dugsiga, ayna ku dhisaan caawimaado haboon, iyo kaalmooyin lagu caawinaayo ardayda qabi kara dhibaatooyinka dhanka xaadirista iyo/ama ganbiya dugsiga. (Arag, Qaybta V.)
D. Macalimiintu waa inay si sax ah u diiwaan gashaan xaadiirista ardayda maalin kasta dugsiyada hoose, iyo xiisad kasta inta lagu jiro dugsiga dhexe.
E. Shaqaalaha dugsiga ayaa raaci doona tilmaamaha soo sheegista iyo qorista maqnaanshaha, ayna ku jiraan xal u helida maqnaanshiyaasha ardayda, sida ay dejisay waaxda nidaamyada xogta ardayda.
Maqnaanshiyaasha waxaa loo diiwaan gashaa "A" = Bilaa cudur daar; "E" = Cudur daar leh; "S" = Cayrin; iyo "L" = Soo daahay.

F. Macalimiintu waa inay shaqo kabis ah siiyaan kumana ganaaxi karaan ardayda shaqada ay gafeen markii ay maqnaayeen ayagoo cudur daar haysta. Ayadoo aan laga eegayn nooca maqnaanshah, macalimiinta ayaa lagu boorinayaa inay u ogolaadaan ardaydooda inay soo kabaan shaqooyinka ka maqan.

II. Xaadirista – Waxbarashada Tooska loo tagaayo

A. Waalidiinta iyo ardaydooda ayaa si wadajir ah masuul uga ah xaqiijinta in ardaygoodu si joogto ah dugsiga u soo xaadiro.
   1. Ardayda ka diiwaan gashan dugsiga guriga ama dugsi gaar loo leeyahay ayaa sidoo kale ka diiwaan gashan dugsi degmeed sababaha diiwaan gelinta labada qaybood ah awgeed. Ardayda ayaa laga diiwaan gelin karaa keliya hal degmo dugsiyeed; diiwaan gelinta labada qaybood kuma jirto diiwaan gelinta labo degmo dugsiyeed iskumar.

B. Ardayda waxay a cudur daaran karaan xaaridista saxda ee dugsiga oo sababo sharci ah: ayna ku jiraan jirada, oo noqon karta mid jireed ama mid dhimirka ah; caafimaadka dhimirka ama habdhaqanka ee ardayga; balamaha caafimaadka; xaaladaha degdega ah ee qoyska; geerida xubin kamid ah qoyska ama saaxiib ay isku dhow yihiin; xuska fasaxyada diimaha; munaasabadaha qoyska; shaqada dugsiga oo la ogolaaday; ama maqnaansho uu ogolaanaayo qorshaha waxbarashada gaarka ah ee ilmaha ku jira da'da dugsiga, ama qorshaha caawimaada.

C. Shaqaalaha dugsigu waa inay siiyaan turjumaano, turjumaadaha, ama adeegyada kale ee muhiimka ah waalidiinta si loogu fududeeyo inay si haboon ugala hadlaan dugsiga maqnaanshiyaasha ardaydooda. Heerka aqoonta Ingiriisiga ma caqabadaha kale ee luuqada ayaan keeni karin in maqnaanshaha ardayga loo qoro mid aan cudur daar lahayn.

D. Dhammaan maqnaanshiyaasha waxaa loo aqoonsan yahay bilaa cudur daar ilaa waalidku uu dugsiga uga waramo sababta ardaygu u maqan yahay, maqnaanshiyahana ay xal u helaan shaqaalaha dugsigu.

E. Waalidiinta waxaa lagu boorinayaa inay bayaan qoyan soo diraan ugu yaraan hal maalin kahor maqnaanshiyaha la mudeeyay, gaar ahaana maqnaanshaha waqtiga dheer.

F. Dugsigu waa inuu qoraa maqnaanshiyaha cudur daarka leh ee munaasabada mudeysan ee dugsiga ama booqashada horey loo qorsheeyay ee dhakhtarka uu ugu tagaayo marka waalidku keeno cadeynta qoran.
   1. Dukumiintiyada ka yimaada dhakhtarka ayaan loogu baahnayn xaqiijinta xanuunka dhimirka ama jirka ee cudur aarka saxda ah leh.

G. Waalidiintu waa inay keenaan cudur daarka maalin kasta oo ardaygoodu maqan yahay.

H. Ardayda haysta maqnaanshaha cudur daarka leh ayaa la siin doonaa fursad ay ku soo kabaan shaqada iyo layliyada dhaafay, hase yeeshee, waa masuuliyad ayaga saaran inay shaqada kabista ah kasoo qaataan macalimiintooda. Macalimiinta ayaa helitaan iyo adeeg furan oo macquul ah siin doona ardayda si ay u helaan layliyada kabista ah.

I. Diiwaanka 'buundo maleh' (‘NG’) ayaa badeli karta buundada xarfaha ah marka ardaygu uu muddo dheer fasax cudur daar leh ku maqnaado laakiin looma adeegsan karo ganaaxa maqnaanshiyaasha bilaa fasaxa ah. NG ayaa lahayn buundo ama saamayn ku dhacaysa celceliska buundada ardayga.

J. Waalidiinta doonaaya in ardaygoodu ka qaybgalo safarka ama nashaadaadka qoyska kuwaasoo u baahan in ardaygu ka maqnaado dugsiga inta u dhexaysa afar ilaa 10 maalmood oo xiriir ah, waa inay ku wargeliyaan maamulaha ama wakiilka si qorshe hordhac ah maamuluhu ugu sameeyo maqnaanshaha ardayga.
   1. Maamulaha ayaa go'aansan doona haddii maqnaanshiyaashaan la kordhiyay ay saamayn xun ku yeelan karaan waxbarashada ardayga. Inkastoo layliyada qaar lasoo kabi karo, qaar kamid ah khibradaha fasalka ayaan lasoo kabi karin, hormarka ardayga ayaana caqabad ku imaan kartaa. Macalimiinta ayaa siin kara layliyo kale oo badel u ah shaqooyinka fasalka kuwaasoo aan lasoo kabi karin.
   2. Ayadoo aan laga eegayn qorsheyaasha hore, haddii maqnaanshaha cudur daarka leh ee ardaygu ka badato toban maalmood, marka uu go'aansho maamuluhu ardayga ayaa laga saari karaa dugsiga.
      a. Arday uu maamuluhu ka saaray dugsiga ayaa dib dugsiga looga diiwaan gelin karaa marka ardaygu dugsiga ku soo laabto.

K. Haddii uusan waalidku qorsheyaal hore la dejin maamulaha ardayga maqnaanshaha dheer galaaya iyo haddii uusan dugsigu helin waalidka ama ardayga si uu u xaqiijiyo sababta ardaygu muddo dheer u maqan yahay, maqnaanshaha ardaygu waa bilaa cudur daar. Marka ay sidaan dhacdo, haddii maqnaanshaha aan la fasixin ee ardayga ay ka badnaato 10 maalmood oo kuwa dugsiga oo xiriir ah, diiwaan gelinta ardayga ee dugsiga ayaa laga burin doonaa.
   1. Dugsiyadu waa inay u diraan ogeysiiska 10 maalmood ah ee qoran ee ka saarida dugsiga waalidka. Ogeysiiskaan waa in lagasoo diraa boosto sharci ah ama nidaamka gacan ka saarida oo la xaqiijiyay.
   2. Dugsigu waa inuu adeegsadaa foomka dugsi ka saarida 10 maalmood ah oo laga heli karo PowerSchool si uu u wargeliyo waalidka.
   3. Dugsigu waa inuu si sax ah u soo sheegaa xubinada ardayga ee nidaamka xogta ardayda ee degmada.

L. Arday hadda ka diiwaan gashan degmo dugsiyeed, lagu hayo guriga ama isbitaal la dhigay, maqnaana ama la filaayo inuu maqnaado wax ka badan 10 maalmood oo kuwa dugsiga ah oo xiriir ah sabab la xiriirta xanuun,

ama naafo, ayaa u qalmi kara barnaamijka waxbarashada degmada ee isbitaalka/guriga lagu siiyo. Waalidiintu waa inay u gudbiyaan codsiga qoraalka ah ee adeegyada oo uu saxiixay dhakhtarka ardayda daawayna waaxda adeegyada ardayda ee degmada sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.

M. Marka uu waalidku soo gudbiyo codsi qoraal ah, ardayga dugsiga dhexe ayaa la fasixi karaa hal xiisad cashar si uu ardaygu uga qaybgalo casharka diinta. Codsiyada noocaas ah waa in loo gudbiyaa maamulaha sanad dugsiyeed kasta oo fasaxa la codsanaayo.

N. Degmada ayaa sanad kasta xogta soo socota u gudbin doonta Guddida Waxbarashadda Gobolka Utah:
   1. maqnaanshiyaasha leh cudur daarka saxda ah; iyo
   2. maqnaanshiyaasha aan lahayn cudur daarka saxda ah.

III. Xaadirka Barnaamijyada Dugsiga Dhexe iyo Dugsiga Sare ee Oonlaynka ah

A. Sharciga gobalka iyo degmada ayaa ka doonaaya in ardaydu ay si joogto ah uga qaybgalaan hawlaha casharada ee lagu baxsho barnaamijyadooda oonlaynka ah.
   1. Ka qaybgalka joogtada ah ee barnaamijka oonlaynka ah ee degmada waxaa lagu qeexaa in ardaygu galo Nidaamka Maareynta Waxbarashada ee saxda ah (tusaale, Canvas ama SeeSaw) Ugu yaraan labo maalmood kasta ayna hormar waxbarasho ka sameeyaan dhamaystirka koorsada.

B. Haddii aan arday si joogto ah uga qaygaleyn koorso gaar ah, talaabooyinka soo socda ayaa la samaynayaa:
   1. Macalinka ayaa u sheegi doona shaqaalaha ay qusayso ee dugsiga in aan ardaygu gelin nidaamka koorsada sadex maalmood oo xiriir ah ama ka dib dhacay shaqadii laga rabay.
      a. Waalidiinta ardayda ayaa lala xiriiri doonaa midkood khadka taleefanka ama iimeelka si loogala hadlo ka qaybgalka ardayda ee barnaamijka.
         i. Haddii aan waalidku jawaab bixin, waraaq sharciyaysan ayaa loo diri doonaa boostada waalidka taasoo sharxaysa xaalada.
      b. Ardayga ayaa lagu xiri karaa macamin siiya casharo gaar ah, haddii loo baahdo.
   2. Haddii aan ardaygu gelin ama dhamayn shaqada kadib shan maalmood, ardayga waxaa loo gudbin doonaa maareeyaha kiiska ee loo xilsaaray.
   3. Ardayga waa laga reebi doonaa koorsada kadib toban maalmood oo uusan ka qaybgelin.

IV. Qorshaha Diiwaan Gelinta La ansixiyay ee Ardayga

A. Marka ardayga wax lagu baro oonleenka/hawi waxbarasho oo hab muuqaal ah oo lagu siiyo dugsiga uu caadiyan ardaygu toos u xaadiro, degmadu waxay dabagal ku sameyn doontaa xaadirista ardayga ee fasalada tooska ah ama fasalada kooxaha ah iyo iyadoo loo marayo dhameystirka shaqooyinka madaxbannaan ama kuwa isku midka ah.
   1. Macalimiinta waxaa laga doonayaa inay qoraan ayna dabaqaan xaadirinta maalin kasta; xogta diiwaan gelinta oo sax ah waa in lagu hayaa nidaamka xogta ardayga ee degmada.
   2. Ardayda waxaa looga baahan doonaa inay dhammaystiraan layli muujinaya fahamkooda ku saabsan casharka maalinta.
   3. Macallimiintu waxay diiwaangelin doonaan xaadiritaanka toddobaad kasta laakiin waxay awood u yeelan doonaan inay cusboonaysiiyaan diiwaangelinta xaadirinta ee arday kasta oo dhammaystira hawsha (laha) loo baahan yahay toban maalmo dugsiyeed ah gudahood ah Marka toban maalmo dugsiyeed la dhaafo, ardayga waxaa loo calaamadeyn doonaa in uu maqanyahay maalin kasta inta aysan soo xaadirin.
   4. Haddii goobta waxbarashada iskudhafan (labada toos loo tago iyo waxbarashada oonlaynka ah), waxaan sidoo kale ku dari doonaa xaadirinta fasalka tooska loo tago taasoo qayb ka ah cabirka
   5. Waalidiintu waxay dib u eegi karaan diiwaanada xaadirista ardaygooda ayagoo ka eegaya barta waalidiinta ee PowerSchool sidoo kale waxay fiirsan karaan howlaha maalinlaha ah ee ardaydooda ee Canvas.

V. Dedaallada Xalinta Maqnaanshaha Xad Dhaafka ah

A. Maamuleyaasha dugsiga ayaa kala shaqeyn doona ardayda iyo waalidiinta xal u helida maqnaanshiyaha dabo dheeraada.

   Maamuleyaasha dugsiga ayaa kala shaqeyn doona shaqaalaha xafiiska, la taliyaasha, iyo macalimiinta fasalka si loo xaqiijiyo in goob soo dhawayn leh ay helaan ardayda maqnaanshuhu ku bato iyo waalidiintooda. Dhammaan jawaabaha dugsiga waa inay dhiiri gashaan hawlaha isku xirnaanta ee fasalka.

B. Dedaallada Xalinta Maqnaanshaha Xad Dhaafka ah ee ilmaha gaaray da'da dugsiga waa in lagu daraa, marka ay suuragalayso:
   1. dhammaan jawaabaha dugsiga oo dhiiri gelinaaya hawlaha isku xirnaanta ee fasalka;
   2. nidaamyo saaxiib la ah ilmaha xiliyada nasiinada iyo/ama qadada kuwaasoo taageeraaya dhisida xiriirada fasalka, iyo kordhinta ku dhiiri gelinta ardayda inay ka qaybgalaan;
   3. talo bixinta ardayga ee uu baxsho macalinka, la taliyaha dugsiga, shaqaalaha bulshada, iyo/ama maamuleyaasha;
   4. la tashiga gudiga adeegyada dugsiga ardayga si loo abuuro caawimaadaha;

5. samaynta isbadello kasta oo muhiim ah oo lagu sameeyo manhajka iyo dejinta jadwal lagu daboolaayo baahiyaha garka ah ee ardayga;
6. tixgelinta dookhyada uu soo jeediyo waalidku;
7. la socoshada xaadirista dugsiga ee ardayga iyo siinta xoojin ku aadan hormarka;
8. maamulka dugsiga ayaa mudeyn doona kulan lala yeelanaayo waalidka iyo ardayga si looga doodo ciladaha xaadirista;
9. ka qaybgalka ikhtiyaariga ah ee dhexdhexaadinta, haddii ay suurgal tahay; iyo
10. siinta waalidka ardayga, marka ay codsadaan, liiska khayraadka la heli karo si looga caawiyo waalidka xal u helida maqnaanshaha dabo dheeraaday ee ardayga.

C. Marka laga soo tago dedaallada kor lagu sheegay, degmada ayaa qori karta liiska caawimaada bulshada iyo wakaaladaha sharci fulinta si loo xaqliyo dhibaatooyinka xaadirista, keliya sida haboon ee macquulka ah.

D. Dugsi kasta wuxuu akhrin doonaa xogta xaadirista sanad kasta si uu u qiimeeyo in dugsigu uu si sax ah u dhaqan gelinaayo caawimaadaha xaadirista.

VI. Ogeysiinta Goo-goysnimada iyo Hanaanka U gudbinta Maxkamada

A. Sida ku cad sharciga gobalka, maamulaha dugsiga, wakiilkiisa ama wakiilkeeda, ama khabiirka goo-goysnimada (oo halkaan si wadajir ah loogu yeeraayo "maamulaha dugsiva") ayaa soo saari kara ogeysiiska goo-goynimada una diraaya arday iyo waalidka ardayga kadib marka uu bato maqnaanshihiisa bilaa sababta ah.

B. Maamulaha dugsiga/degmada ayaa saari kara ganaacsiyada maamulka ilmaha da'da dugsiga ee:
1. ku jira fasalka 7 ama ka sareeya, ilaa in ilmuhu uu ka yar yahay maahee 12 sano; iyo
2. goo-goyska ah.

C. Maamulaha dugsiga ayaa u diri kara Ogeysiinta Goo-goysnimada ee Koobaad ardayda fasallada 7 iyo ka badan, kuwaasoo jira ugu yaraan 12 sano, kuwaasoo dugsiga u gooyay ugu yaraan shan jeer intii lagu jiray sanad dugsiyeedka.
1. Dib u eegista xaadirista asbuuclaha ah ee lagu sameeyo nidaamyada PowerSchool iyo PowerBI ayaa aqoonsan doona ardayda gaaray xadiga maqnaanshaha bilaa fasaxa ah ee shanta jeer.
2. Liiska waa in dib u eegis lagu sameeyaa si loo xaqiijiyo saxnaanta xogta qusaysa maqnaanshiyaasha ardayga, iyo si loo go'aansho in Ogeysiinta Goo-goysnimada ee Koobaad ay tahay in la diro.
3. Xaadiritaan ardayga ayaa lala socon doonaa ardayda la siiyo ogeysiiska goo-goysnimada kadibna maamulaha dugsiga ayaa dhaqan gelin doona caawimaadaha sida lagu cadeeyay qorshaha dugsiga.

D. Maamulaha dugsiga ayaa soo saari doona Ogeysiinta Goo-goysnimada ee Labaad oo loo diraayo ardayda maqnaata 10 maalmood ama ka badan bilaa cudur daar.
1. Maamulaha dugsiga ayaa dhaqan gelin doona ugu yaraan sadex caawimaadood (arag, qaybta III.B.) sida lagu sheegay qorshaha dugsiga.
2. Kulannada gudiga adeegyada dugsiga iyo ardayda iyo maxkamada carruurta ayaa la adeegsan karaa haddii caawimaadaan loo arko mid ku haboon ardayda iyo qoyska.

E. Maamulaha dugsiga ayaa soo saari doona Ogeysiinta Goo-goysnimada ee Sadexaad oo loo diraayo ardayda maqnaata 15 maalmood ama ka badan bilaa cudur daar. Ogeysiiskaan ayaa lagu dirayaa boosto sharci ah ama nidaamka gacan ka saarida oo la xaqiijiyay.
1. Maamulka dugsiga ayaa la kulmi doona waalidka iyo ardayga si loo abuuro qorshaha xaadirista lana socon doona 14 maalmood oo kuwa dugsiga ah.
    a. Maamulka dugsiga ayaa la xiriiri doona iskuduwaha wada shaqaynta dugsiga qoyska iyo degmada si dib u eegis loogu sameeyo caawimaadaha loona go'aansho talaabooyinka xiga haddii caawimaadii ugu danbaysay aan lagu guuleysan.
2. Maamulka dugsiga iyo/ama la taliyaasha ayaa iskudayi doona ugu yaraan hal booqasho oo ay guriga ku tagaan kahor inta aan maxkamada loo gudbin ama la gaarin 10 maalmood ee dugsiga laga cayrinaayo.
3. Haddii ardayga kayar 18 sano uu sii wado inuu dugsiga ka maqnaado kadib kulanka lala sameeyo maamulaha dugsiga, maxkamad ayaa loo gudbin karaa ayadoo caawimaad laga helaayo iskuduwaha wada shaqaynta degmada, qoyska iyo dugsiga.

VII. Jebinta Sharciyada Waxbarashada Qasabka ah ee Ardayda Fasalada 1 ilaa 6

A. Sida ku cad sharciga gobalka, waalidiinta ilmaha da'da dugsiga ku jira ayaa la siin karaa ogeysiiska jebinta sharciga waxbarashada qasabka ah haddii ilmaha da'da dugsiga ku jira uu:
1. ku jiro fasalka 1 ilaa 6; iyo
2. Uu dugsiga u gooyo ugu yaraan shan jeer inta lagu jiro sanad dugsiyeedka..

B. Ogeysiisyada waxbarashada waajibka ah ayaa lagusoo gudbin doonaa jadwal iskumid ah waxayna raacayaan isla hanaanka ogeysiisyada xaadirista ee ku qoran Qaybta IV ee kore.

1. Dhammaan caawimaadaha iyo habraacyada loo baahan yahay kahor inta aan lasoo saarin ogeysiisyada goo-goysnimada waa in la raacaa kahor inta aan lasoo saarin ogeysiiska waxbarashada qasabka ah.
2. Ogeysiiska jebinta sharciga waxbarashada qasabka ah oo loo diray waalidka:
   a. waa inuu ku amraa waalidka:
      i. inuu la kulmo maamulka dugsiga si looga dooro xaadirista iyo dhibaatooyinka ilmaha da'da dugsiga ku jira; iyo
      ii. inuu la shaqeeyo degmada si loo xaqiijiyo xaadirista joogtada ah ee ilmaha da'da dugsiga ku jira;
   b. waa inuu cadeeyaa maamulaha dugsiga/degmada ee waalidka laga doonaayo inuu la kulmo;
   c. waa inuu sheegaa inuu yahay danbiga heerka B in waalidku uu kas ah ama bilaa sabab macquul ah uu:
      i. ku fashilmo inuu la kulmo maamulaha dugsiga/degmada ee loo xilsaaray si looga doodo xaadirista iyo dhibaatooyinka ilmaha da'da dugsiga ku jira; iyo
      ii. ku fashilmo inuu ka hor istaago in ardayga da'da dugsiga gaaray uu dugsiga u ganbiyo shan jeer ama ka badan inta lagu jiro mudada kahartay sanad dugsiyeedka;
   d. waa in waalidka loogu diraa adeegga gaarka ah ama boostada sharciga ah; iyo
   e. waa inaan lasoo saarin ilaa in ardayga da'da dugsiga ku jira uu dugsiga u ganbiyay ugu yaraan shan jeer inta lagu jiro sanad dugsiyeedka.

C. Haddii maamuleyaasha dugsiga/degmadu ay hayaan sabab ay ku aaminaan in, kadib marka la diro ogeysiiska jebinta sharciga waxbarashada qasabka ah, in waalidku ku fashilmay inuu sameeyo dedaal daacad ah si uu u xaqiijiyo in ilmaha da'da dugsiga ku jira uu helo waxbarashada saxda ah, soo saaraha ogeysiiska jebinta sharciga waxbarashada qasabka ah waa inuu u sheegaa Waaxda Adeegyada Carruurta iyo Qoyska iyo qareenka ku haboon ee degmada sida uu qabo sharciga gobalku.

VIII. Hanaanka Racfaannada Ogeysiisyada Goo-goysnimada iyo Waxbarashada Qasabka ah

A. Ardayga iyo waalidka ayaa xaq u yeelan doona inay racfaan ka qaataan ogeysiis kasta ama ogeysiiska jebinta sharciga waxbarashada qasabka ah ayagoo codsanaaya dhageysi ay u sameeyaan Gudiga Adeegyada Ardayda iyo Dugsiga (SSC). Codsigaan waa in lagu soo gudbiyaa qoraal ahaan kadibna boostada loogu diraa ama toos loogu geeyaa maamulaha dugsiga uu ardagu dhigto 10 maalmood oo kuwa dugsiga ah kadib marka la helo ogeysiiskaan.

B. SSC ayaa qabanaysa dhageysi 20 maalmood gudahood waxayna go'aan ku soo saaraysaa 20 maalmood gudahood kadib dhageysiga.

C. Haddii go'aanka SSC aysan ku qancin ardayga iyo/ama waalidku, go'aanka ayaa racfaan laga qaadan karaa ayadoo loo diraayo gudiga dib u eegista oo uu magacaabaayo agaasimaha adeegyada ardayda.
   1. Racfaankaan waa in lagu soo gudbiyaa qoraal ahaan kadibna boostada loogu diraa ama toos loogu geeyaa agaasimaha adeegyada ardayda 20 maalmood oo kuwa dugsiga ah gudahood kadib marka la helo go'aanka gudiga SSC ee dugsiga.
   2. Gudiga dib u eegista oo uu magacaabay agaasimaha adeegyada ardayda ayaa, markuu sidaas doorto, qaban kara dhageysi labaad. Go'aanka maamulka ee kama danbaysta ah oo ku aadan racfaanka ayaa lasoo saari doonaa 20 maalmood oo kuwa dugsiga ah gudahood.

IX. Shardi dhaaf ku aadan Xaadiritaan Dugsiga - Waxbarashada Guriga lagu baxsho - Cadeynta Waalidka ama Masuulka

A. Ardayga waa in laga dhaafaa shardiga xaadirista haddii waalidka ardaygu soo gudbiyo cadeynta saxiixan ee nootaayada leh oo uu u diro degmada dugsiga ardaygu dagan yahay, si waafaqsan sharciga gobalka iyo xeerka gudiga.

B. Cadeynta waa in lagu daraa xaqiijinada soo socda ee waalidka:
   1. Ilmaha gaaray da'da dugsiga ayaa ka qaybgeli doona dugsiga guriga loogu dhigo.
   2. Waalidiintu waxay qaadanayaa masuuliyada buuxda ee waxbarashada ilmaha gaaray da'da dugsiga, marka laga reebo in ardaygu leeyahay diiwana gelinta labada nidaam.
   3. Waalidiinta ayaa leh masuuliyada buuxda ee doorashada agabka shaqada iyo buugaagta casharada, waqtiga, goobta, iyo qaabka casharada, iyo qiimaynta casharada waxbarashada guriga.

C. Cadeymaha waa in loo diraa agaasimaha fulinta ee sinaanta waxbarashada iyo taageerada ardayda si uu u ansixiyo shardi dhaafka.

D. Nuqulka shardi dhaafka la ogolaaday ayaa loo diri doonaa maamulaha dugsiga ee ay qusayso.

E. Dugsiyada ayaan gelin doonin arday nidaamkooda xaadirista haddii ardayga laga dhaafo shardiga xaadirista dugsiga.

F. Cadeynta saxiixan ee nootaayada la saaray ee loo diray degmada ayaa sii shaqayn doonta ilaa inta ilmaha da'da dugsiga ku jira uu dhigaayo dugsiga guriga, degmada ayaana sii ahaan doonta degmo dugsiyeedka ilmaha gaaray da'da dugsiga.

G. Waaxda adeegyada ardayda ayaa soo saari doonta shahaado sheegaysa in ilmaha gaaray da'da dugsiga laga dhaafay shardiga xaadirista dugsiga sanad dugsiyeedkaas gaarka ah:
   1. 30 maalmood gudahood kadib helitaanka cadeynta saxiixan ee nootaayada leh; iyo
   2. marka la gaaro ama kahor Agoosto 1 sanad kasta intaas kadib ilaa ilmaha da'da dugsiga gaaray laga diiwaan gasho maahee degmo dugsiyeed, waalidka ayaa u sheegaaya waaxda adeegyada ardayda in ilmaha gaaray da'da dugsiga uusan sii dhigan doonin dugsiga guriga ama degmada uu daganaa ay isbadeshay.

X. Shardi dhaaf ku aadan Xaadiritaan Dugsiga - Kale

A. Waalidka arday ka wayn da'da 16 sano kaasoona dhamaysay fasalka sideedaad ayaa codsan kara in ardayga la siiyo ogolaanshaha qaybta ah ama shardi dhaafka xaadirista dugsiga asagoo codsi u diraaya maamulaha. Ardaygu waa inuu dugsiga dhigtaa qayb kamid ah maalinta ama dugsiga guriga loogu dhigaa.

B. Qaab sanadle ah, waalidka ardayga ka wayn da'da 16 sano ayaa codsan kara in ardayga si buuxda looga dhaafo xaadirista dugsiga ama maamulaha ayaa ku talin kara in shardi dhaafkaas la sameeyo sababaha soo socda midkood:
   1. In ardaygu horey u dhamaystay shaqadii laga rabay inuu ka qalin jebiyo dugsiga sare, ama uu muujiyay inuu aad u bartay xirfadihii iyo kartiyadii laga rabay.
   2. Ardaygu uu shaqeeyo, shaqaduna ay saamayn wanaagsan iyo fursado ku filan u siiso kobcinta waxbarashadiisa.
   3. Ardaygu uu qabo xanuun jirka ama dhimirka ah kaasoo ka dhigaaya xaadirista ardayga mid aan suuragal ahayn, sida uu xaqiijiyo dhakhtar.
   4. Saamaynada wanaagsan iyo fursadaha ku fulan ee waxbarashada lagu siiyo shaqada ilmaha ku jira da'da dugsiga.
   5. Ardaygu uusan awoodin inuu ka faa'iideyso xaadirista dugsiga sabab la xiriirta awood la'aan ama fikirka xun ee joogtada ah ee ku aadan xeerarka dugsiga iyo anshaxa.

C. Kahor intaan laggu talin in arday shardiga laga dhaafo ama laga fasaxo dugsiga si buuxda, gudiga adeegyada ardayda ee dugsiga (SSC) waa inay akhriyaan codsiga shardi dhaafka si loo xaqiijiyo in caawimadaha ka caawinaaya ardayga inuu dugsiga kusii jiro la iskudayay lana diiwaan gasho.

D. Marka waalid uu codsado shardi dhaaf ama marka maamuluhu ku taliyo in arday shardi dhaaf loo sameeyo, maamulaha ama wakiilkiisa waa inuu la xiriiraa waalidka ardayga uuna iskudayaa inuu mudeeyo shirka waalidka.

E. Nuqulka dhammaan foomamka shardi dhaafka ardayga waa in loo diraa iskuduwaha wada shaqaynta qoyska iyo dugsiga ama agaasimaha sinaanta iyo helitaanka waxbarashada.

F. Haddii arday shardi dhaaf loo sameeyay uu doonaayo inuu ku laabto degmo dugsiyeed fasalkii uu ardaygu la socdayna aysan wali qalin jebin, ardaygu waa inuu la xiriiraa maamulaha si uu u helo dib u diiwaan gelin.
   1. Haddii arday ama waalid uusan ku qancin go'aanka maamulaha, ardayga ama waalidka ayaa racfaan ka qaadan kara go'aanka maamulaha una diri kara agaasimaha adeegyada ardayda.

G. Ardayda jira 16 iyo 18 sano waa inay si rasmi ah uga baxaan dugsiga waana in laga dhaafaa shardiga xaadirista dugsiga si ay u galaan imtaxaan u dhigma dugsiga sare. Fiiri, Siyaasadda Guddiga I-2: Dhibcaha iyo Shuruudaha Qalanjebinta, iyo habraacyada la socda ee maamulka si aad u hesho faahfaahin.

H. Haddii kormeeraha guud uu go'aansho in arday ka wayn da'da 16 uusan awoodin inuu ka faa'iideyso xaadirista dugsiga sabab la xiriirta awoodis la'aan ama fikirka xun ee joogtada ah ee ku aadan xeerarka iyo anshaxa dugsiga, ardayga ayaa laga dhaafi karaa xaadirista dugsiga.

XI. Ardayda qaba Naafooyinka U Qalma

Haddii ardayda qaba naafooyinka sida ku cad sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah, ama ardayda uu difaacaayo midkood qodobka 504 ee Sharciga Baxnaaninta ama Sharciga Ameerikaanka Naafada ah ay si xad dhaaf ah dugsiga ugu ganbiyaan ayna soo hoos galaan shuruudaha habraacyadaan, kooxda ku haboon ayaa xaqiijin doonta in habraacyadaan loo dhaqan gasho qaab waafaqsan sharciyada iyo xeerarka quseeya ee gobalka iyo federaalka.

Ma jiro shaqaale ka tirsan dagmada ama arday lagu takoori karo shaqada ama barnaamij kasta ama hawl kasta ay dagmada leedahay oo ku saleysan da', midab, itaal darri, ahaashada lab/dhedig, aqoonsiga lab/dhedig, macluumaadka firka, asal qaran, xaamilonimada, isirka, diinta, kacsiga qofka, ama xaaladda waayo aragnimada qofka. Dagmada waxay ballan qaaday in si siman loo helo iyo in ay bixiso fursadaha siman xagga barnaamijyadeeda, adeegyada iyo shaqada kana mid ah siyaasadaheeda, hababka ashtakada, helitaanka barnaamijka, isticmaalka adeegyada dagmada, fududeynta iyo arrimaha kale ee la xariira Fursadda Shaqada Siman. Dagmada waxay kaloo dhamaan kooxaha dhallinta ku qoran liiska Title 36 Sharciga Mareykanka, kana mid ah kooxaha scoutka, siisay sinaan xagga helitaanka adeegyada dagmada. Qofka soo socdaa waxaa loo qoondeeyay inuu qabto waydiimaha iyo cabashooyinka ku saabsan takoorka sharci darrada ah, dhibaataynta iyo aargoosiga. Tina Hatch, U hogaansanka iyo Baadhitaanada/Qodobka IX Isku duwaha, 440 East 100 South, Salt Lake City, Utah 84111, (801) 578-8388. Waxaad kaloo la xariiri kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office for Civil Rights), Denver, CO, (303) 844-5695.